Astaamaynta Qoraalka

Calaamadaha iyo Xeerarka Qoraalka

(The Punctuation Guide)

Mustafa Fayruus

Juun 2021

Tusmada

Hordhac	02
1. Joogsi	03
2. Calaamadda Su`aasha	05
3. Calaamadda Yaabka	06
4. Hakad	06
5. Joogsi Dhiman	08
6. Laba Dhibcood	08
7. Kolmaha Xigashada	09
8. Xarafka Weyn	10
9. Calaamadaha Muujinta ama Xoojinta	11
10. Laba Bilood	12
11. Tirada	12
12. Taariikhda iyo Saacadda	15
Gunaanad	18

Hordhac

Qofku marka uu hadlayo hadalkiisa si habaysan ayuu u soo gudbiyaa. Habka dhawaaqa, dareenka wejiga ka muuqda, dhaqdhaqaaqa xubnaha jirka; iyo sidoo kale, neefsashada, aamusidda iwm ayaa ka qaybqaata habaynta hadalka. Qurux ay u yeesho ka sokow, habayntaasi waxay suurtagelisaa in hadalka la fahmo.

Sidaa hadalkaba loo habeeyo, waa in qoraalkana hanaan iyo habsami loo qoraa. Waxyaabaha erayada ka baxsan, ee ka qaybqaata gudbinta macnaha iyo habaynta hadalka, iyagoo calaamado ah, waa in lagu daraa qoraalka. Taas ayaana loo yaqaanaa *astaamaynta qoraalka* ama *dalaynta qoraalka iwm, ama (punctuation) (علامات الترقيم).* Qoraalkan waxaan ku adeegsannay eraybixinta *(Astaamaynta Qoraalka)*.

Astaamaynta qoraalku waa in qoraalka loo yeelo calaamado ama astaamo kaaba qoraalka, si loo helo akhris sax ah, faham sax ah, iyo, sidoo kale, qurxinta qoraalka. Astaamaynta qoraalku waxay leedahay calaamado/astaamo iyo xeerar la raaco oo habeeya qoridda hadalka. Aalaaba qofku marka uu hadlayo waxaa macnaha kaaba luuqda codka, neefsashada (aamus yar), dareenka wejiga ka muuqda iyo dhaqdhaqaaqa ay xubnaha jirku samaynayaan. Astaamaynta qoraalku waa iskuday ah in arrimahaas lagu muujiyo calaamado la isla yaqaan.

Inkasta oo astaamaynta qoraalku sidaa muhiim u tahay, haddana waxaa dhacda in dadka qaarkii iska fududaystaan, gaar ahaan dadka aan lagu tababbarin bilowgii waxbarashadooda. Astaamaynta qoraalka oo la khaldaa, waxay dhaawici kartaa macnaha qoraalku gudbinayo; qoraagana waxay ku tahay ceeb iyo dhaliil ay tahay inuu ka dhowrsado.

Tusaalooyinka hoose, is barbardhig farriinta ay gudbinayaan laba weerood oo kasta oo isku lamaan. U fiirso, macnaha laba weerood oo kasta waxaa kala duway adeegsiga caalamadda hakadka (,) iyo meesha ay qoraalka kaga jirto.

Tus: #1

a) Waxaan arkay Cali, Axmed walaalkii.
b) Waxaan arkay Cali Axmed walaalkii.

#2

a) Guurso gabadha hooyadeed, ha faraxdee.
b) Guurso gabadha, hooyadeed ha faraxdee.

#3

a) Macallin, Cali Quraanka wuu dhammeeyay.
b) Macallin Cali Quraanka wuu dhammeeyay.

#4

a) Waxaan is raacnay Cali, Warsame iyo Yuusuf.
b) Waxaan is raacnay Cali Warsame iyo Yuusuf.

#5

a) Waa laba wiil iyo gabar wada dhashay
b) Waa laba: wiil iyo gabar wada dhashay

Labad tusaale ee #1, (a) Cali & Axmed waa walaalo, halka (b) Cali Axmed qof keliya yahay, oo Axmed aabbo yahay. Sidoo kale #1(a) qofka la arkay waa Cali, halka #1(b) qofka la arkay yahay Cali walaalkii. Tusaale #2, (a) hooyada ayaa la guursaday, halka (b) gabadha la guursaday. Tusaalaha #3, (a) macallin iyo Cali laba qof ayay kala yihiin, halka (b) Macallin Cali uu qof keliya isku yahay; dhanka kale, (a) macallinka ayaa lala hadlayaa, Calina waa laga hadlayaa, laakiin (b) waxaa laga hadlayaa Macallin Cali. Tusaalaha #4, (a) hadlaha waxay is raaceen saddex qof, halka (b) ay is raaceen laba qof oo keliya. Tusaalaha #5, (a) saddex qof ayaa la sheegayaa halka (b) ay laba qof keliya ka yihiin.

Tusaalayaasha kore waxay muujinayaan qiimaha ay astaamayntu u leedahay qoraalka iyo sida macnaha hadalku ugu dhisan yahay.

Haddaba, waxaan si kooban u soo gudbinaynaa astaamaha iyo xeerarka qoraalka, ee aalaaba lagula kulmo qoraallada. Waxaa jira calaamado iyo xeerar intan ka faahfaahsan, oo uu u baahan yahay qofka qoraya qoraal cilmiyeed, sida ardayda jaamacadaha iyo cilmibaarayaasha, ama qofka qoraya sheeko-faneed iwm. Qofkani, ha u noqdo buugaagta iyo hageyaasha arrimahan sii faahfaahinaya.

Inkasta oo ay badiba isku mid yihiin astaamaha qoraalka ee laga adeegsado dalalka kala duwan, haddana waxaa jira meelo kooban, oo u badan xeerarka weheliya astaamaha, oo ay ku kala duwan yihiin.

Xilligan qurbajoogta Soomaaliyeed ama ardayda dalalka dibadda wax ku soo bartay; waxaa la arkaa in lagu soo kala tababbaray xeerar meelo kooban ku kala duwan, sida hanaanka Ingiriiska (British Style) iyo hanaanka Maraykanka

(American Style). Markii Far-Soomaalida la qoray waxaa la hanaqaaday adeegsiga astaamo iyo xeerar la caadaystay, oo ku qotomay hannaanka (British Style). Halkan waxaan mudnaanta siinayaa xeerarkaa hanaqaaday ee Soomaalidu caadaysatay, oo badanaaba la jaanqaadaya habka Ingiriiska (British Style).

Waxaase jira in xeerarka qaarkood uu isa soo tarayo adeegsiga hannaan ka duwan kii hore ay Soomaalidu u caadaysatay, tani oo badhxaysa hannaankii hore u hanaqaaday. Waxay iila muuqataa in arrintani, sida badan, ka timaaddo Soomaalida ku soo tababbaratay habka Maraykanka iyo adeegsiga aaladda kombiyuutarka oo ay dhacdo inuu dad badan u dooran yahay habkan Maraykanku; iyo sidoo kale guud ahaanba saamaynta Maraykanka ee dunida ku sii fidaysa. Meelihii ay iila muuqato in arrintan la yar iftiimiyo waxaan raaciyay baraarujin.

Inkasta oo badiba calaamadan astaamaynta qoraalku Soomaalida u yeesheen magacyo hirgalay, waxaase jira in calaamadaha qaarkood loo bixiyay dhowr magic. Waxaan ku dadaalay inaan adeegsado eraybixinta hirgashay. Sidoo kale, maadaama badiba Soomaalida wax baraty yaqaanaan afafka Carabiga iyo Ingiriisga, badiba eraybixinta waxaan raaciyay dhiggooda afafka Ingiriisiga iyo Carabiga; ujeedkuna waa akhristuhu dhakhso u haleelo calaamadda loo jeedo.

Qoraalkani waa mid kooban oo loogu talagalay baahida guud. Sidaas darteed, qofkii u baahda fahfaahin dheeraad ah ha ka raadsado buugaagta iyo hageyaasha arrintan sii faahfaahinaya.

Ka bogasho wacan!

1. Joogsi (Full Stop) (Period) (نقطة)

Joogsi:

Joogsigu waa calaamaddan (.), waxaana loo adeegsadaa marka weertu dhammaato, caadina tahay; (yacnii ayna su`aal toos ah iyo yaab midna ahayn). Weedh kasta oo ah amar ama codsi waxay ku dhammaataa joogsi. Joogsigu, waxa uu kala soocaa labada weerood.

Tus: Faarax waxa uu dhegaysanayaa idaacadda.
Fadlan, koob shaah ah i sii.
Wuxuu waydiiyay meesha uu joogo. (Waa su`aal dadban)

Dhibic:

Dhibicdu (.) waa astaan gasha meelo gaar ah ee qoraalka, waxaana ka mid ah:

Marka magaca qofka iwm la soo koobo

Tus: Maxamuud A. Cali = Maxamuud Axmed Cali
M. D. Afrax = Maxamed Daahir Afrax

Looma baahna in dhibic la raaciyo erayada loo soo gaabiyay jagada, xurmada, iwm ee hor dhaca magaca gaarka, sida: Sh (sheekh) Md (mudane), Mw (marwo), Dr (Diktoor), Inj (injineer), iwm.

Tus: Waxaan arkay Sh Faarax iyo Md Cali oo u socda Dr Ibraahin.

Baraarujin:

a) Erayada loo soo gaabiyay jagada, xurmada, iwm ee hor dhaca magaca gaarka, waxaa jira laba hab, oo kala ah in dhibic la raaciyo iyo in laga tago (Sh/Sh., Md/Md., Dr/Dr.). Labada midkoodna khalad maaha, waxaase loo sii badanayaa in dhibicda laga maarmo maadaama aysan hawl maahane wax kale soo kordhinayn. Si ay noqotaba, ma habboona in labada hab lagu wada adeegsado isla hal qoraal dhexdiisa, ee waa in midkood lagu kaaftoomaa.

b) (Dhibic) iyo (Joogsi) waa isku summad, waxayse qabtaan hawlo kala duwan, oo ayno qaarkood soo tilmaannay.

2. Calaamadda Su`aasha/Weydiinta (Question Mark) (علامة السؤال)

Calaamadda su`aashu waa ( ? ), waxaana la adeegsadaa marka ay dhammaato **weer**-su`aaleed.

Tus: Ma aragtay qalinkaygii?

Haddii su`aashu tahay mid dadban ama la soo werinayo, waxay ku dhammaataa joogsi.

Tus: Wuxuu waydiiyay meesha uu joogo. (su`aal dadban)

3. Calaamadda Yaabka (Exclamation Mark) (علامة التعجب)

Calaamadda yaabku waa (!), waxaana la qoraa marka lagu dhawaaqo hadal yaab ku jiro, ama filanwaa ka muuqdo. Calaamaddani waxaa kale oo ay muujisaa dareen xoogan, oo noqon kara farxad, naxdin, digniin, qoomamo iwm.

Tus: Alla, qurux badanaa surwaalkani!
Alla, wiilku nacasanaa!
Haddaba, waddadan ha isku marin!
Alla, hoogay oo ba`ayeey!

Saddexda astaamood ee joogsiga, calaamadda su`aasha iyo calaamadda yaabku waxay asteeyaan weer dhamaystiran oo la soo ebyay. Laakiin astaamaha soo socda, ee kala ah: hakad, joogsi dhiman, laba dhibcood iyo kolmaha xigashadu waxay dhacaan weerta dhexdeeda.

4. Hakad (Comma) (فاصلة)

Calaamadda hakadku waa (,). Hakadku waa calaamadda loogu adeegsi badan yahay, looguna khaldi ogyahay.

Hakadka waxaa la adeegsadaa weerta dhexdeeda, si loo kala sooro ama loo kala saaro erayo ama oraahyo weerta dhexdeeda ah, waxaana ka mid ah noocyadan soo socda:

Taxane erayo/oraahyo ah saddex iyo ka badan:

Tus: Waxaa yimid Cali, Faarax, Geeddi iyo Faadumo.
Xafiiska, dhinaciisa waqooyi, dhinaciisa koonfureed, iyo meelo kale oo ku dhowba, waxaa ku yaalla dhir qurxoon.
Cali waxa uu tegay, ka soo iibsaday dhar, kana soo noqday magaaladii.

Taxane laba sifo ama ka badan

Tus: Qalin cusub, oo cas, ayaan soo gatay.

Qofka lala hadlayo (loo yeedhaha) ka dib

Tus: Macallin, casharkan ii sax.

Faaraxoow, sii soco waan kaa daba iman doonaaye.
Waryaa, halkaas ha istaagin!

Laba oraahood oo isku xiran, *sida shardiile iyo jawaabtiisa iwm, oo ka bilowda erayada maadaama, haddii, inkastoo, ka dib (kaddib), sida, marka/markii, si*

Tus: Haddii aad soo habsaantid, waan kaa tegayaa.
Maadaama aadan dayntii hore bixinin, kuma siin karo dayn kale.
Si aad kursi hore u heshid, xilli hore kaalay.
Inkasta oo ay arrintani culus tahay, haddana waynu ka heshiin karnaa.

Eray ama oraah arar ah:

Tus: Waa yaab, ee maxaan yeelaa?
Tolow, qalinkaygii xaggeen dhigay?
Fadlan, koob shaah ah ii shub.
Simistarkii hore, waxa aan galay kaalinta koowaad.

Labada qaybood ee weerta kala dhex gala:

Tus: Maalintii dhowayd ee roobku da`ay, Cumar ma imanin jaamacadda.

Labo hakad oo isku lammaan, oo ka hor iyo ka dib dhaca oraah dhextaal ah, oo naxwe/dhisme ahaan dheeraad ah

Tus: Waxaad i daymisaa, haddii aad hayso, shan kun oo Shilin.
Cali waxa uu u marmarsoonayaa, sida aan filayo, inuu baxo.
Maxamed, oo galay kaalinta 1aad, waxa uu ku guulaystay abaalmarin qiime leh.

Magaalo dhacda gobolka/dalka hortiisa

Tus: Waxaan ku dhashay Burco, Togdheer; waxaanan deganahay Qaahira, Masar.

Milicsi, ka dabatag hadalka hore

Tus: Kaasi waa buuggaygii, maaha kaagii.
Warsame waan bartay, maaha qof dadaal yar.

Erayo iyo oraahyo gaar ah gadaashood, *sida: haa, maya, weli, sidaa darteed, sidaa awgeed, maxaa yeelay, maxaa wacay, fadlan iyo kuwa la hal maalaba.*

Tus: Jimcaale dayntii hore sooma celinin. Sidaas darteed, dayn kale lama siin karo.
Weli, alaabtii lama keenin.

Fadlan, koob shaah ah ii shub.
Maya, arrintaas kulama qabo.

Hakadka ugu Dambeeya Taxanaha

Hakadka ugu dambeeya hakadyo taxane ah, waxaa raacaya xiriiriyaha *(iyo)*. Badiba qoraallada Soomaalida, lama qoro oo waa laga tagaa hakadka ugu dambeeya ee (iyo) ka horeeya. Sida badan ka tegista hakadkani mugdi ma gelinayso macnaha, laakiin mararka qaarkood ayaa macnaha mugdi ama khalad gelayaa. U fiirso tusaalahan (Dhismahan waxaa wada deggan kulliyadaha: culuumta siyaasadda iyo warbaahinta, caafimaadka, injineeriyada, iyo kombiyuutarka.) iyo (Dhismahan waxaa wada deggan kulliyadaha: culuumta siyaasadda iyo warbaahinta, caafimaadka, injineeriyada iyo kombiyuutarka.). Injineeriyada iyo kombiyuutarku, ma laba kulliyadadood baa mise waa isku hal kulliyad?

Qorista hakadka u dambeeya taxanaha waxaan ku soo gunaanadi lahaa in asal ahaan hakadkaa aan la qorin oo laga tago, sida hanaqaadayba; haddiise uu macnaha saamayn ku yelanayo, sida tusaalaha kor ku xusan, waa in la qoraa.

Baraarujin:

a) Haddii ay kaa murugto meesha ku habboon hakadka, waxaad kaalmaysataa inaad qoraalka kor u akhrido; meesha aad neefsato ayuu hakadku gelayaa!

5. Joogsi Dhiman (Semicolon) (فاصلة منقوطة)

Joogsi dhiman (;) ama hakad culus; waxa uu u dhexeeyaa joogsiga iyo hakadka. Wuxuu asteeyaa meel macnuhu buuxsamay, welise weertu aanay ebyamin, wuxuuna galaa booska xiriiriyayaasha.

Tus: Cali waxa uu sitaa shaati duug ah, oo cas; surwaal Jiinis ah, oo caddaaday; iyo taleefan cusub, oo qaali ah.

6. Laba Dhibcood (Colon) (نقطتان)

Calaamadda labada dhibcood (:), waxaa loo isticmaalaa:

Qeexidda waxyaabo taxan oo dheer;

Tus: Dhismahan waxaa wada deggan kulliyadaha: culuumta siyaasadda iyo warbaahinta, caafimaadka, injineeriyada, iyo waxbarashada.

Waxaa la dhisay guddiga horumarinta iyo qorshaynta, oo kala ah:

1. Yuusuf Xuseen Guddoomiye
2. Jaamac Cali Guddomiye ku-xigeen
3. Aamino Axmed Xoghaye
4. Cabdi Abshir Khasnaji
5. Xirsi Faarax Xubin
6. Leylo Geelle Xubin
7. Xasan Guuleed Xubin

Kala saaridda hadal la soo sheegay iyo waxa loola jeedo hadalkaa

Waa hadalkaa hore oo lagu sii nuuxnuuxsanayo ama la sii faallaynayo.

Tus: Waxaa keliya oo aad ka adag tahay hal shay: muran iyo hadal aan dhammaanayn.

Casharkan hore ayaad u soo dhigateen: waa kii toddobaadkii hore.

Baraarujin:

a) Saddexda calaamadood ee joogsiga, calaamadda su`aasha iyo calaamadda yaabku waxay muujiyaan in weertu dhammaatay.

b) Saddexda calaamadood ee hakadka, joogsiga dhiman iyo labada dhibcood waxa ay dhacaan weerta dhexdeeda.

c) Lixda calaamadood, ee aan kor ku xusnay, lagama horaysiiyo wax *bannaan ama space* ah, laakiinse, waa laga dambaysiiyaa. Lama ogola in la qoro (… laakiinse ,) (…adag tahay hal shay : muran .); waa in loo qoraa (… laakiinse,) (…adag tahay hal shay: muran.). Kombiyuutarku aalaaba wuu baraarujiya haddii la ilduufo, oo calaamadahan laga horaysiiso *bannaan ama space*.

7. Kolmaha Xigashada (Quotation Mark) (علامة التنصيص)

Calaamadda kolmaha xigashadu waa (“ ”), waxaa kale oo loo qori karaa (‘ ’), waxaana loo adeegsadaa soo-guurinta hadal la soo xiganayo.

Tus: Cabdi wuxuu yiri: “horumarku, dadaal iyo cilmi ayuu u baahan yahay”.

Haddii qoraalka weertu ku soo dhammaado kolmaha xigashada, astaamaha qoraalku waxay dhacayaan kolmaha kaddib, sida tusaalaha kore ka muuqata. Dhinaca kale, waxaa jira arrimo aan xigasho ahayn oo mararka qaarkood loo adeegsado kolmahan.

Baraarujin:

a) Kolmaha xigashada waxaa ka horrayn kara hakad ama laba dhibcood. Sida badan, waxaa hakad laga hormariyaa laba jeer: (1) marka oraah ka yar weer dhammaystirani ka hormarto kolmaha ama (2) marka hadalka kolmaha xigashada ku jiraa gaaban yahay oo ka yar yahay toddobo eray. Dhanka kale, waxaa laba dhibcood laga hormariyaa laba jeer: (1) marka weer dhammaystiran ka horrayso kolmaha, ama (2) marka hadalka la soo xigtay ee kolmaha ku jiraa uu dheer yahay, oo yahay toddobo eray ama ka badan. Waxa aan marna kolmaha xigashada ka hormarin joogsi dhiman ama semicolon (;).

b) Haddii hadalka la soo tebiyo, looma baahna kolmaha xigashada, sida: Jimcaale ayaa ii sheegay inuu berri iman doono.

8. Xarafka Weyn (Capital Letters)

Xarfaha waaweyn waxaa loo isticmaalaa meelo ay ka mid yihiin:

Bilowga weerta:

Tus: Waxaan imid bishii Jannaayo, maalin Isniin ah. Bil ka dib, waxaan u safri doonaa magaalada Beledweyne ee gobolka Hiiraan. Dhakhso ayaan u soo noqon doonaa.

Magacyada gaarka ah ee qof, dal, qabiil, qowmiyad, diin, gobol, iwm:

Guuleed, Islaam, Kiristaan, Soomaali, Oromo, Beledweyne, gobolka Hiiraan, dalka Jabuuti, iwm

Tus: Cali waa Soomaali haysta diinta Islaamka, oo degan magaalada Mombaasa ee dalka Kiiniya.

Magacyada bilaha iyo maalmaha:

Bisha Jannaayo, maalin Isniin ah iwm.

Tus: Bisha Juun waxa ay ku dhammaatay maalin Sabti ah.

Erayada muhiimka ah ee cinwaannada (Yacnii magacyada, falka iwm; lamase weyneeyo xiriiriyayaasha iwm)**:**

Tus: Xaaladda Waxbarashada iyo Caafimaadka ee Dalka Hooyo
Dal Dad Waayay iyo Duni Damiir Beeshay
Qiimaha Cuntada iyo Shidaalka oo Qaaliyoobay

Jagada (title-da) hor dhaca magaca gaarka ah:

Waa isku mid in erayga jagadu dhamaystiran yahay iyo in la soo gaabiyay, sida: Macallin Faarax, Wasiir Khadar, Injineer Kulmiye, Madaxweyne Geelle, Md Cali, Mw Sahra, Inj Kulmiye, Dr Bulxan, iwm. ((Md (mudane), Mw (marwo), Dr (Diktoor), Inj (injineer), iwm.))

Tus: Waxaan arkay Macalin Faarax iyo Injineer Kulmiye oo u socda Wasiir Khadar.

Haddii aanu magaca gaarka ahi la socon, kuma bilaabmayaan xaraf weyn, Sida:

Tus: Waxa uu macallinku sii maray injineerka, intaanu wasiirka u tegin.

Baraarujin:

a) Xarfaha (kh), (sh), iyo (dh) marka xaraf weyn ahaan loo qorayo bilowga erayga, waxaa la weyneynayaa astaanta koowaad oo keliya; sidan: (Kh), (Sh), iyo (Dh).

9. Calaamadaha Muujinta ama Xoojinta (Italics, Bold …)

Marka loo dan leeyahay in la muujiyo xarfo ama erayo gaar ah, si loo baraarujiyo ama loo xoojiyo, waxaa la adeegsadaa astaamayn ay xilligan ugu caansan yihiin in laga dhigo *italics* (oo ah xarfaha oo la yar jiifiyo), **bold** (oo ah in lagu qoro midab xoogan) ama <u>underline</u> (oo ah in hoosta laga xarriiqo).

Tus: Mobaylka uu sitaa waa *ismaartfoon* qaali ah.
(Sababtu waa erayga oo aan weli si fiican u Soomaaliyoobin)

Berri waa imtixaankii xisaabta. Ha illoobin inaad **mastarad** soo qaadatid.

Waan soo dhowahaye, waxaad ii sii dalabtaa *shaahaygii caddayska* ahaa.

Baraarujin:

a) Midabaynta xoogan ama **bold** ayaa ka muujin og *italics*-ka. Sidaas darteed, waxaa habboon in erayada *la muujinayo* laga dhigo *italic*, kuwa **aad loo muujinaya** laga dhigo **bold**.

b) Marka la adeegsanayo calaamadaha muujinta ama xoojinta, waa inaan qoraalka dhexdiisa lagu badin adeegsigooda. Adeegsiga xaddhaafka ahi wuxuu macne tirayaa ujeedkii muujinta.

10. Laba Bilood (Brackets/ Parentheses)

Labada bilood ama labada qaanso, oo ah laba bilood oo iska soo horjeeda (( )), waxaa loo adeegsadaa si xog *suubis* ama dheeraad ah weerta loogu daro.

Tus: Gurigan (oo la dhisay konton sanno horteed) wuxuu u baahan yahay in la dayactiro.

Haddii laga saaro hadalka labada bilood ku dhex jira, dhismaha iyo macnaha weertuba waa sax. U fiirso isla tusaalaha kore.

Tus: Gurigan wuxuu u baahan yahay in la dayactiro.

Labada bilood waxaa kaalintooda geli kara laba hakad. Hase yeeshee, si looga kaaftoomo in hakadyadu qoraalka ku bataan darteed ayaa loo adeegsadaa labada bilood.

Waxaa kale oo jira bilahan ([ ]) iyo ({ }), adeegsi ahaanna ka duwan labada bilood (( )). Bilahan gaarka ah adeegsigoodu wuu kooban yahay, waxaana loo adeegsadaa hawlo gaar ah.

11. Tirada (Numbers)

Tiradu, siyaabo kala duwan ayay ku timaaddaa, waxaana loo qoraa habab kala duwan.

Qorista Tirada, lambar ahaan iyo eray ahaan

Si guud, tirada waxaa loo qori karaa lambar ahaan, sida: 1, 2, 10, 23 … Sidoo kale, waxaa loo qori karaa eray ahaan, sida: koow, laba, toban, labaatan iyo saddex… labada habba waa sax, waase in qofku, qoraalka dhexdiisa, hal hab ku adeegsadaa.

Sida badan, qoraalka waxaa lagu adeegsadaa hab isku dhafan, oo sagaal iyo wixii ka yar loo qoro eray ahaan (afar, lix…), toban iyo wixii ka badanna lambar ahaan, 10, 15, 99, 213…

Tus: Dugsigu wuxuu ka kooban yahay lix fasal, waxaana dhigta 215 arday.

Baraarujin:

Weerta laguma bilaabo lambar. Tusaale ahaan, ha qorin (215 arday ayaa dugsiga dhigta.), waxaad qortaa (Dugsiga waxaa dhigta 215 arday.)

Tiro Jagaale (Ordinal Number)

Tirada Jagaaluhu waxay tilmaantaa jagada uu shayga laga hadlayaa kaga jiro taxanaha uu ka tirsan yahay. Tirada jagaalaha ahi waxay ka samaysantaa tirada oo lagu lifaaqo *–aad*.

Tus; Fasalka shanaad, safka tobnaad, ardayga labaatanaad,

Tirada jagaalaha ah, waxaa loo qori karaa tiradii oo la raaciyo lifaaqa *–aad*. Marka kombiyuutarka la adeegsanayo, waxaa fiican in lifaaqan lagu qoro far yar oo kor u laalan *(superscript)*. Lifaaqan *-aad* waa isku mid dhammaanba tirada.

Tus: Faysal waxa uu dhigtaa fasalka 9^{aad}, Roodana fasalka 12^{aad}. Faysal waxa uu galay kaalinta 15^{aad} ee fasalkiisa, Roodina kaalinta 3^{aad} ee fasalkeeda. Faysal iyo Rooda waxay deris yihiin Cabdi Yare, oo galay kaalinta 37^{aad} ee fasalkiisa. Saddexdooduba waxa ay jeclaayeen inay galaan kaalinta 1^{aad}.

Baraarujin

a) Marka la qorayo tirada jagaalaha ah, dadka qaarkood waxay ku daraan jiitin (-), sida: 4-aad, 8-aad ...iwm. In jiitinta la raaciyo, sida *4-aad*, iyo jiitinta laga tago, sida *4aad*, labaduba waa sax. Hase yeeshee, ma jirto baahi loo qabo qoritaanka jiitinta. Sidaas darteed, waxaa habboon in tirada jagaalaha la qoro jiitin la`aan, sida: 4aad, 8aad iwm.

Ku-tirinta Xarfaha Alifbeetada

Xarfo ayaa la isticmaali karaa, beddelka lambarka, si wax loo tiriyo. Inkasta oo habka taxnaanta Alifbeetada Farsoomaalidu tahay: b, t, j, x . . . w, h, y; haddana marka xarfaha wax lagu tirinayo, waxaa la raacaa habka taxnaanta alifbeetada Af Ingiriisiga (ISO basic Latin alphabet), waana sidan:

a	b	c	d	e	f	g	h	i	j	k	l	m	n	o	p	q	r	s	t	u	v	w	x	y	z

.

Habkan taxnaanta alifbeetada Af Ingiriisigu, waa habka ay raaceen qaamuusyada Af Soomaaligu, aaladda kombiyuutarkuna way sii xoojinaysaa.

Inkasta oo ayna badnayn, haddana way jiraan dad raaca habka taxnaanta Alifbeetada Farsoomaalida ee b, t, j, x . . . Wuxuuse habkani iska shiiqay, markii aaladdii teebka laga guuray, loona guuray isticmaalka aaladda Kombiyuutarka.

Lambarrada Roomaanka (Roman Numerals)

Sidoo kale, meelaha qaarkood, waxaa tirinta taxanaha loo adeegsadaa Lambarrada Roomaanka. Lambarrada Roomaanku waxa ay ku socdaan toddobo xaraf, oo midba qiime gaar ah leeyahay, waana sidan:

Xarafka	I	V	X	L	C	D	M
Qiimaha	1	5	10	50	100	500	1000

I (1), II (2), III (3), IV (4), V (5), VI (6), VII (7), VIII (8), IX (9), X (10), XX (20), XXX (30)…

Asal ahaan, tirsiga waxaa lagu adeegsadaa tirada 1, 2, 3 …; waxaase jira marar loo baahan yahay in la adeegsado hab tirsi kale. Tusaale ahaan, marka qoraalku leeyahay taxanayaal kala heerar duwan *(list levels)*; si ayna isugu murgin, waxa aan la huraynin in heer kasta loo adeegsado hab tirsi gaar ah, sidan:

Qaybta I
1) -----
2) -----
    a. -----
    b. -----
    c. ------
3) ----------
4) ----------

Hababkan tirsiga taxanayaasha, waxaa kuu fududaynaya adeegsiga loo yaqaan *(numbering)* ee kombiyuutarku leeyahay.

Baraarujin:

a) Marka la qorayo taxane aan tirintiisa dan laga lahayn, halkii lambarrada waxaa la adeegsadaa calaamado, oo mid kasta sadar ku bilowda; waana hannaanka loo yaqaan *(bulleting)* ee kombiyuutarku leeyahay.

Hakadka tirada

Tirada lambar ahaan u qoran, waxaa jira meelo la adeegsado calaamadda hakadka (,), iyo meelo aan lagu adeegsan.

Hakadka kunleyda:
Hakad ayaa la adeegsadaa tirada ka kooban shan god ama ka badan. Saddex god kasta ayaa hakad la raaciyaa, iyadoo dhanka midig laga soo bilaabayo. Sidaas darteed, ayaa loogu magacaabi karaa *(Hakadka Kunleyda)*.

Tusaale	10,000	87,945	750,000	3,000,000	43,570,635
	100	1000	10,000	100,000	1,000,000	10,000,000

Hakad lama adeegsado marka tiradu ka kooban tahay afar god ama ka yar
Tusaale 1960 7500 9999 879 46

Marka tiradu jajab leedahay, hakad ma galo lambarada dhibicda midig ka xiga.
Tus: 6.05 236.75 49.987658

Marka tiradu jajab tahay, eber ayaa lagu bilaabaa, oo dhibicda horteeda dhaca.
Tus: 0.25 0.89

12. Taariikhda iyo Saacadda

Qoridda waqtigu waxay ka mid tahay waxyaabaha ugu muhiimsan qoraallada, ha noqoto marka la qorayo taariikhda ama marka la qorayo saacadda. Waxaa loo qoraa habab kala duwan oo la kala xusho. Waxaa habboon in la raaco habka akhristayaasha qoraalku caadaysteen, oo marka qoraalku ku qoran yahay Af-Soomaali ah dadka Soomaaliyeed.

Taariikhda
Taariikhdu waxa ay ka kooban tahay maalinta, bisha iyo sannadka.

Waxaa jira dhowr hab oo loo qoro taariikhda, waxaase Soomaalida ku shaacbaxay hal hab, oo ah habka u kala horreeya sidan, (maalinta/bisha/sannadka). Habkan ayaa caan ka ah Geeska Afrika.
Tus: 26 Juun 1960; 26/6/1960; 26/6/60
7 Abriil 2017; 7/4/2017; 7/4/17.

Halka aan ka adeegsannay calaamadda (/), waxaa kale oo la adeegsan karaa calaamadaha (-) ama (.); markaa 7/4/2017 = 7-4-2017 = 7.4.2017. Waxaase ugu adeegsi badan (/).

Sida badan, waxaa la qoraa 26/6/1960 iyo 7/4/2017, oo bisha lambarkeeda ayaa la qoraa ee magaceeda lama qoro. Dhinaca kale, waxaa adeegsiga ku badan

26/6/60 iyo 7/4/2017. U fiirso, sanadka 1960 waxaa lagu kaaftoomay 60, 2017 waa la wada qoray, oo sanadkii 2000 iyo wixii ka dambeeyay sanadka waa la wada qoraa, si aanu jahawareer u dhalan, oo maalinta ama bisha loogu malayn. Qoraalka taariikhda ee habkan, oo Soomaalidu u badan tahay, wuxuu waafaqsan yahay habka Ingiriiska (British Format).

Sidoo kale, waxaa jira habka Maraykanka (American Format), oo badanaa ka muuqda kombiyuutarka iyo qoraallada lagu diyaariyo. Habkani wuxuu u qormaa sidan: 6/26/1960 ama Juun 26, 1960; 4/7/2017 ama Abriil 7, 2017. U fiirso, marka bisha magaceeda la qoro, bisha iyo maalinta uma dhexeeyo wax hakad ah, laakiin maalinta iyo sannadka waxaa u dhexeeya hakad.

Marka qoraalka lagu sheegayo sannadka keliya, waxaa la mid ah hadalka e, waxaa la qoraa sannadka oo dhammaystiran, sida: 2005, 2018, 2030 iwm. Haddii la sheegayo bisha oo ayna la socon maalinta ama sanadka midkood ama labadoodaba, waxaa la qoraa magaca bisha ee lambarkeeda lama qoro.

Tus: Waxaa la dejiyay qorshaha 2030.
Mushaarkii bisha Abriil weli lama qaadan.
Faarax waxa uu dhashay Juun 2002.
Shirku waxa uu dhacaya 10^{ka} Agoosto.

Marka la tilmaamayo muddo toban sanno gudahood ah, oo aan sannad gaar ah loo jeedin, waxaa la yiraahdaa (kun, sagaal boqol iyo siddeetamaadkii) ama (siddeetamaadkii), oo loola jeedo qiyaastii 1980-1989, waxaa habboon in loo qoro 1980aadkii.

Tus: Sidan ayaa dharka loo lebisan jiray 1970aadkii.

Saacadda

Halka maalin (habeen iyo maalin wada jira) waxa ay ka kooban tahay 24 saacadood, halka saacna waxa uu ka kooban yahay 60 daqiiqo, halka daqiiqana waa 60 ilbiriqsi/seken. Sida caadiga ah, waxaan qornaa saacadda iyo daqiiqadaha. Ilbiriqsiga waxa la qoraa marka baahi dheeraad ahi keento, sida tartanka oroddada iwm.

Saacadda marka lambar ahaan loo qorayo, waxaa la adeegsadaa laba dhibcood. Dhanka bidix saacadda ayaa xigta, dhanka midigna daqiiqadaha.

Tus: 2:15 8:30 12:40 20:10

Tirinta saacadda waxaa la raacaa laba hab ee (12) iyo (24) saacadood.

Habka (24) saacadood

Waxaa la qoraa waqtiga saacadda, lamana raaciyo astaan kale, sida:

Tus: Waxaan toosay 7:00, waxaan gegida diyaaradaha tegey 10:00, waxayse diyaaraddu nala kacday 13:00. Shan saacadood ka dib ayay ku degtay magaaladaan u socday, waxaanse aqalkaygii gaaray 21:30.

Habkan aalaaba waxaa lagu adeegsadaa qoraallada khuseeya dad ku kala firirsan deegaanno kala duwan, sida safarrada diyaaradaha iwm.

Habka (12) saacadood

Waxaa la qoraa waqtiga saacadda, waxaana la raaciyaa xilligeeda, sida: subax, barqo, duhur, galab, fiid iyo saq dhexe. Markaa, hadalkii hore waxa uu u qormayaa sidan:

Tus: Waxaan toosay 5:00 subaxnimo, waxaanse suuqa tegey 9:00 barqonimo, Maxammedna wuxuu ii yimid 12:00 duhurnimo. Waxaan guriga ku soo noqday 5:00 galabnimo, waxaanse seexday 9:30 fiidnimo. Shanqar ayaan ku soo baraarugay 12:00 saqda dhexe.

Waxaa kale oo la yeeli karaa in la qoro waqtiga saacadda, lana raaciyo (AM) ama (PM). Waxa ay (AM) astaysaa waqtiga duhur ka hor laga soo bilaabo saqda dhexe; halka (PM) astayso waqtiga duhurka ka dib ilaa laga gaarayo saqda dhexe. Markaa, hadalkii hore waxa uu u qormayaa sidan:

Tus: Waxaan toosay 5:00 AM, waxaanse suuqa tegey 9:00 AM. Waxa aan guriga ku soo noqday 5:00 PM, waxaanse seexday 9:30 PM. Shanqar ayaan ku soo baraarugay 12:00 AM.

Waxaa la doorbidaa in (AM) iyo (PM) lagu qoro xarfaha waaweyn ama capital letters, isla markaan aan loo dhexaysiinin wax dhibic ah.

Baraarujin:

Marka saacadda lagu sheegayo hadal, ee ayna qoraal ahayn, waxaa habboon in la adeegsado eraybixinta af Soomaaliga ah ee ay dhammaanba dadweynuhu wada fahmayaan, laba-daraadle warbaahinta iyo hadallada fagaaraha laga jeedinayo, oo ah: subaxnimo, barqonimo, duhurnimo, galabnimo, fiidnimo iyo saqda dhexe.

Tus: Waxaan toosay 5:00 subaxnimo, waxaanse suuqa tegey 9:00 subaxnimo. Waxaan guriga ku soo noqday 5:00 galabnimo, waxaanse seexday 9:30 fiidnimo. Shanqar ayaan ku soo baraarugay 12:00 saqda dhexe.

Calaamadahan (AM) iyo (PM) waxaa laga soo gaabiyay erayo Laatiin ah, waxaana lagu isticmaalaa Ingiriisiga iyo afaf kaleba. Soogaabintan waxaa adeegsada Soomaalida qaarkood. Sidaas darteed, waxba kuma jabna in la soo ergisto, oo sideeda loo adeegsado.

Gunaanad

Astaamaynta qoraalka iyo xeerarkiisu malaha xog badan oo la xafido ee waa xirfad laysku laylyo. Qofku wuxuu ku hanan karaa muddo kooban oo uu isku laylyo deedna joogteeyo adeegsigooda. Sidaas ayay kuugu noqonayaan caado qoraaleed kula socota.

Qoraaga (iyo tifaftiraha) ayuu xil ka saaran yahay soo bandhigidda qoraal habboon. Dabcan, marka ugu horaysa qoraalka, waxaa mudnaanta la siiyaa xogta iyo macnaha, laguma mashquulo sugidda astaamaha qoraalka iyo hagaajintiisa guud. Sidaas darteed, waxaan laga fursanayn in la tifaftiro. Sugidda, hubinta, hufidda iyo bilidda qoraalka waxaa qabta hawsha tifaftirka.

Waxaa dhacda in laga fududaysto tifaftirka qoraalka iyo sugidda astaamaha iyo xeerarka qoraalka. Ceebta ay qoraalka u yeelayso iyo macnihiisa ay dhaawacayso ka sokow, waxay culays iyo qulqulataynba ku tahay akhristaha. Akhristuhu kansho iyo niyad midna uma hayo inuu la rafto arrin qoraagu ka caajisay.

Sida qoraalka habbooni ugu baahan yahay hagaajinta dhismaha hadalka iyo sixidda higgaadda erayada, sidoo kale ayuu ugu baahan yahay dhowridda astaamaha iyo xeerarka dhigaalka, taasi oo qayb ka ah qoraalka. Sidaas darteed, yaan la dhayalsan ee caado ha laga dhigto.

Dhammaad